




# Hagaha



Toronto  
Community  
Housing



# Xog dheeri ah sii baro

Akhbaaro dheeraad ah oo ku saabsan mawduucyada ku jira hagahaan oo lagu daray wargeyska Toronto Community Housing, kulanada, nidaamyada, foomamka, iyo tuseyaalka, ayaad ka baran kartaa [torontohousing.ca](https://torontohousing.ca).

**Si aad u heshid nuqul kale oo hagahaan ah, waxaad sameyn kartaa:**

- In aad ka daabacato khadka [torontohousing.ca/safetyguide](https://torontohousing.ca/safetyguide)
- Inaad booqato bar kulanka, heer gobol ama Xafiiska Maamulka
- La Xiriirto Xarunt Dhexe ee Taakulaynta Macaamilka **416-981-5500** ama [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca)

Iluhu waxay ahaayeen kuwo la isku hubo markii la daabacayey.

Sixitaanada u dir [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca)

©Agoosto 2021 Toronto Community Housing

# Soo Dhawaaw

Iyada oo ay leedahay Magaalada Toronto, Toronto Community Housing waxay hoy u tahay 58,000 qoys oo ku nool xaafadaha magaalada oo dhan. Waxaan ku dadaalnaa in aan gaarsiino guryo qiimahooda la awoodi karo, nadiif ah, amaan ah, si wacan loo xifdiyey, oo kuna xiraya kiraystayaasha adeegyo iyo taageerooyin. Waxaan la shaqaynaa lamaanayaal badan oo aan iska kaashano sidii loo kobcin lahaa fursadaha horumarin kara fayaqabka iyo tayada nolosha bulshadeena, iyada oo taasi gacan ka geysato inay Toronto noqoto meel ka fiican meelaha kale ee lagu noolaado.

Ammaanka kiraystayaasha bulshadeenu waa muhimada ugu saaraysa. Kani waa hagahaaga akhbaaraha badbaadada ee ku saabsan dhismahaaga iyo guriyeynta bulshada Toronto. Waxa uu hayaa faahfaahino ku saabsan siyaabaha aad ugu diyaar garoobi karto xaaladaha degdegta ah, iyo weliba waxa la samayn karo marka ay wax dhacaan. Waxa kale oo uu dulmarayaa wixii ay qaybaha kala duwan ee Toronto Community Housing samayn karaan si ay waxtar uga gaysataan xifdinta beelo amaan qaba.

Waxaan u mahad celinaynaa shaqaale iyo kiraystayaal faro badan, iyo weliba xubno ka mid ah Kooxo-Hawleedyada Kiraystayaasha Bulshada iyo Shakhsiyaadka (Tenant Communications Work group) ka Mas'uulka ah Haleelitaanka Qof ahaaneed ee Guddiga (Responsible Personal Accessibility in Toronto Housing) (R-PATH), kuwaas oo taladooda iyo jawaabcelintooda ku darsaday si hagahaan looga dhigo midkaagii. U hayso hagahaan inuu ku anfaco oo nala soo xiriir mar kasta oo aad u baahato caawimaad.

## Xog Muhim ah:

Hagahaan Badbaadadu waxa uu damacsan yahay in uu kuu noqdo il-akhbaareed degdeg ah. Macluumaadka ku jira tilmaan-bixiyahan ayey dhici kartaa inuu isbeddelo ama waqtigu ka dhaco muddo ka dib.

Xogta ku jirta hagahaan waa inaan loo qaadan inay tahay talo sharci ah. Haddii uu jiro iskhilaaf ka yimaada waxa ku qoran hagahaan iyo mid kasta oo ka mid ah sharciga Canada (heer federaal, gobol, ama kuwo kaleba), ama xeerka, habraaca, ama

tilmaamaha Toronto Community Housing, markaa sharciga, habraaca, ama tilmaamaha ayaa ku adag. Wax kasta oo hagahaan ku jira ma ah in loo arko inay yihiin ballanqaad Toronto Community Housing ay u ballanqaadayso inay wax u qaban doonto ama ayna wax ka qaban doonin, ama wax u fidin ama heshiis ah.

**Haddii uu buuggayga haguuhu iga lumay, fadlan soo celi:**

Magaca:

Cinwaanka:



# Jadwalada Tasmada

## Tusmo

Adeegyo iyo Taakulayno .....	8
Lambaro badbaado oo muhim ah .....	8
Ammaanka bulshada dhexdeeda .....	10
Unugga Badbaadada Beesha .....	10
Kooxda Unnugga Badbaaddada Beesha .....	10
Maxaa dhacaya markaad u wacdo .....	11
Waxaad samayn karto .....	12
Kamera Ammaaneed .....	12
Fal-fal - xumooyinka/anshax-xumida .....	13
Maxaa dhici kara.....	15
Waa maxay sabab uga saarid?.....	15
Waxaad samayn karto .....	15
Aqal isku wareejiyaalka.....	15
Waxaad samayn karto .....	16
Ka hortagidda fal-dambiyeed ka dhaca deriska.....	16
Qaabaynta Bii'ada .....	16
Waxaad samayn karto .....	17
Ka hortagidda fal-dambiyeed ka dhaca dabaqaaga ama guryahaaga isa-saarka ah .....	17
Waxaad samayn karto .....	17
Ka hortagid fal-dambiyeed ka dhaca agagaarka barta baabuur dhigashada .....	19
Waxaad samayn karto .....	19
Ammanka dariishadda .....	19
Waxa loogu yeero daariishad dayactiro.....	19
Badbaadada Barandada.....	21
Sida loo waco barando dayactirayaasha .....	21
Korontada oo go'an .....	21
Yaa loogu wacaa Korontada oo go'an.....	21
U diyaar garow korontada oo go'da.....	21

Waxa la sameeyo haddii ay dhacdo in ay korontadu go'do .....	23
Daadgurayn.....	23
Markii ay korontadu soo noqoto .....	24
Waxyeeelo biyo iyo daadad .....	24
Waxaad samayn karto .....	24
Markii uu daad dhaco .....	25
Daadgurayn.....	26
Daad kadib .....	26
Waxaad samayn karto si aad diyaar u ahaato .....	28
Soo buuxi foomka “Lacalla Haddii ay Xaalad Degdeg ihi ka Jirto” .....	28
Xir boorso “qabso oo tag” .....	28
Udiyaargarobidda xaaladaha degdegta ah hadii aad qabto cuuryaanimo.....	30
Caymis .....	32
Badbaadada shimbiraha iyo xayawaanada .....	34
Xayawaanka iyo xaaladda degdegta ah .....	34
Ammaanka dabka .....	35
Diyaar ohoow .....	35
Qorshee marinkii aad ku fakan lahayd .....	35
Haddii uu dab jiro.....	38
Haddii aad ku nooshahay dabaq dheer (in ka badan lix fooq).....	38
Maxaad samayn hadii aadan si aamin ah ku bixi karin .....	38
Haddii uu dabku dharka qabsado.....	40
Hadduu dab dhaco mar aad maqan tahay .....	40
Waxa ay Toronto Community Housing samayso intuu dab socdo .....	40
Dab kabacdi.....	40
Ka hortagga dabka.....	42
Dab halisyada guriga .....	42
Cunto karis taxadar la'aan ah .....	44
Maxaa la sameeyaa haddii uu dab jikada ka kaco .....	45
Xeerka Cusub ee "sigaar laguma cabi karo" .....	46
Sigaar cabidda aan loo aabba yeelin - laga taxadarin .....	46
Shumacyada .....	48
Ku hay gambaleelkaaga qiiqa xaalad xaqiijinaysa in uu shaqayanayo. ....	50
Rukumada calaamadeed ee halista dabeed ee ku yaalla meelaha caamka ah .....	52
Badbaado xilliyeed .....	55
Ammaanka Xilliga Kulaylaha.....	55
Gubashada bannaanka.....	55
Qaboobaan ku joogid kulaylka .....	57

<b>Digniin Kulayl .....</b>	<b>58</b>
<b>Qaboojiyaha ammaansan.....</b>	<b>58</b>
<b>Ammaanka berkadaha dabbaasha.....</b>	<b>58</b>
<b>Badbaadada xilliga qaboobaha.....</b>	<b>60</b>
<b>Digniino cimilo si xad-dhaaf ah u qabow .....</b>	<b>60</b>
<b>Kulayliyeyaal la qaadan karo (space heaters .....</b>	<b>60</b>
<b>Radiyaytarada .....</b>	<b>62</b>
<b>Roob barafayn ah, baraf dhegan, iyo ceeryaamo .....</b>	<b>62</b>
<b>Badbaadada Dabaysha.....</b>	<b>64</b>
<b>Badbaadada Holloween.....</b>	<b>64</b>
<b>Miyaad u baahan tahay nuskhad la tarjumay? .....</b>	<b>66</b>
<b>Lifaaq 1: Lacallah haddii ay xaalad degdeg ihi ka timaado.....</b>	<b>67</b>



# Adeegyo iyo Taakulayno

Waxaad ka wici kartaa ama tagi kartaa Xarunta Taakulaynta Macaamil ee Toronto Community Housing 24 saacadood maalintii, maalin kasta sanadkii adoo ka wacaaua **416-981-5500** ama kala xariiraaya [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca).

Unigga Guriyeynta Bulshada (Community Safety Unit) ee Toronto Community Housing: **416-921-2323**

- Wax dheeri ah ka ogoow Unugga Badbaadada Bulshada ee [bogga 8](#).

## Lambaro badbaado oo muhim ah

Halkaan waxa ku jira liiska lambarada aad wici karto 24 saac maalintii, maalin walba oo sanadka ka mid ah. Xog Muhim ah: Lambaradaan hayso si aad u hesho caawimaad marka aad u baahan tahay caawimaad. Waxaad kale ood ka eegi kartaa [torontohousing.ca/safetynumbers](http://torontohousing.ca/safetynumbers) Liis dheeri ah ilaha badbaadada.

Adeegyada xaaladaha degdegga ah: **9-1-1** (farriin iyo Telefoon, ama TTY, ayaa la helaa). Weligaa markii ay xaalad degdeg ihi jirto wac lambarkaan, waxaana lagugu sii xirayaa Toronto Police

Adeeg, Adeegga Dabka Toronto iyo Adeegyada Caafimaadka degdegga ah ee Toronto.

- Wicitaanka askarta ee aan degdegga ahayn: Wac **416-808-2222** ama **416-467-0493** (TTY) ee xaaladaha aan degdegga ahayn halka aad weli u baahan tahay kaalmo askareed (Qalinshubataysi, wargelin tuugo, iyo wixii ka sii dheer). Toronto Police waxay ku shaqeeyaan si qayb-qayb ah oo magaalada oo dhan ka jira. Booqo [torontopolice.on.ca/divisions](http://torontopolice.on.ca/divisions) si aad u hesho qaybta deegaan ahaan kuugu dhow, iyo xiriirkooda akhbaareed.



- Crime Stoppers: Wac **416-222-8477** ama **1-800-222-8477** haddii aad hayso wax akhbaar ah oo ku saabsan dambi ood la wadaagayso askarta. Qasab ma aha inaad sheegto magacaaga.
- Adeegyada Dhibanayaasha (Victim Services): Wac **416-808-7066** U wac wixii ah kaalmo degdeg ah oo la siiyo dambi dhacay u dhibane.
- Wasaaradda Xeer Ilaalinta Guud, Khadka Guud ee Dhibanaha: Wac **1-888-579-2888** ama **416-314-2447** 24/7 si aad ula hadasho akhbaar-bixiye, jiheeye iyo la taliye. Adeegyada ayaa lagu heli karaa luuqado badan.
- Khadka caawinta Haweenka la weeraray/maagay: U wac **416-863-0511** ama **1-866-863-7868** (TTY) wixii ku taxaluqa haweeney si weerar ah lagu maagay. Adeegyada ayaa lagu heli karaa luuqado badan.



# Ammaanka bulshada dhexdeeda

Markasta wac **9-1-1** wixii degdeg ah sida wixii dhaca ee dab, dambi ama xasarad ah.

## Unugga Badbaadada Beesha **416-921-2323**

Dhammaan kiraystayaashu waxay xaq u leeyihiin in ay ammaan ku helaan xafadahooda iyo deriskooda. Waxaad wici kartaa Unugga Badbaadada Beesha si ay u soo saaraan:

- dhaqdhaqaaqyo la xiriira shacri darro ama faldambiyeed
- ku xad gudubyo meelo baabuur dhigasho
- seero goysnimo
- qaylo is dabo joog ah



Waxaa jooga shaqaale u carbisan in ay ka jawaabaan wicitaanada 24 saac maalintii, todoba casho asbuuciiba.

## Kooxda Unnugga Badbaaddada Beesha

- Guulwadayaal - Constables - khaas ihi ma ahan saraakiil askar ah laakiin waxayse haystaan awood ay ku baaraan oo ku sameeyaan qabasho ama xiritaan hanti ay leedahay Toronto Community Housing. Waxay kormeer ku sameeyaan qaab lug ah, baaskiil, ama iyaga oo gawaari ku jira. Xaalado gaar ah ayey amaanka sugi karaan.
- Saraakiisha hawlfuulisa meelaha gawaarida la dhigto waxay kormeeraan agagaarada gaari dhigashada waxayna awood u leeyihiin in ay gooyaan tikityo oo ay dafaan gawaarida sida sharci darrada ah loo dhigay.
- La taliyeyaasha Badbaadada Beesha waxay caawiyaan in kiraystayaalka la gaarsiiyo barnaamijyo badbaado oo beesha loogu tago meelahooda.
- Xarunta Kala diriteeyaha waxay ka jawaabaysaa wicitaanadaada, waxay ammaan ku haynaysaa saraakiisha iyada oo ilaalinaysa faarequensada idaacada. Waxay kale oo la shaqeeyaan arrimaha ka jawaabcelinmta degdegta ah si ay u

xaqiiyaan in saraakiisha loo diray caawimada ay u baahan yihiin marka ay u baahan yihiin.

Unugga Badbaadada Bulshada waxa uu si dhow u la shaqeeya hay'ado kale oo sharci fuliyeyaal ah sida Adeegga Askarta Toronto - Toronto Police Service. Waxay qabtaan kormeero lagu wehliyo, ka qayb noqdaan mashaariic khaas ah, waxayna wax ka caawiyaan dabogalka iyo dambi-baarista culus.

## Maxaa dhacaya markaad u wacdo

Fariin toosiayaha ayaa weydiinaya su'aalo si loo ogaado waxa aad doonayso.

Su'aalahaasi waxay isugu jiri karaan:

- Magacaaga, Cinwaankaaga iyo lambarada lagaala xiriiri karo (qasab ma ahan in aad akhbaarahaas oo dhan siiso, laakiin haddii ay dhacdadu u baahato in la sii dabo galo si loo xalliyo, taasi waxay noqon kartaa arin taagan haddii shaqaalaha Unugga Badbaadada Bulshada (Community Safety Unit) aysan kula soo xiriir karayn
- Halkaad markaa ku sugan tahay iyo halka caawimada loo rabto
- Yaa ku jira dhacdadada (haddii aad ku jirto aadse wax cuuryaanimo ah qabto, u sheeg fariin kala jiheeyaha in laga yaabo in loo baahdo baahiyo gaar ah)
- Haddii qof wax la gaarsiiyey

Haddii aad ugu wacdo degdeg halka ay dad ama hanti khatar ah ku jiraan, fariin kala jiheeyuhu waxa uu ku weydiin doonaa in aad si deg deg ah ula xiriirto Adeegga Degdegta ah ee Toronto si aad u siiso waxa dhacay ee aad adigu kan ugu horeeya ee og tahay. Fariin kala jiheeyaha ayaa dabadeed ka sii dabo galaya Adeegga Degdegta ah ee Toronto oo u diraya Guulwade Khaas ah goobta ay wax ka dhaceen.

Haddii aysan xaaladdu u baahnayn in uu horay ka yimaado Guulwade Khaas ihi, fariin toosiyeyasha ayaa ku siinaya akhbaar. Dabadeedna Guulwadaha Khaaska ihi waxa uu la shaqaynayaa shaqaalaha iyo Askarta Toronto Police (haddii loo baahdo) in la sii dabo galo weydiimahaagii.

Waxaad weydiin kartaa fariin kala jiheeyaha ama Guulwadaha Khaaska ah ee soo xaadiray lambarka dhacdadada. Haddii aad marka dhacdadada laga war bixinayo rabto in aad noqoto gabi ahaanba qof qarsoon, waa in aad kala xiriirtaa Crime Stoppers **416-222-8477**.

## Waxaad samayn karto

Kiraystaal ayaa si aan toos ahayn beelaheena ugu haysta "Nidaamyada saaxiib" ama kulanada beesha si ay isugu arkaan. Hase ahaatee haddii aad ka welwelayso wax ku saabsan ammaanka ama nabad gelyada, qof ka wac Toronto Community Housing. Kaasi waxa uu nqon karaa shaqaale xaafadeed, shaqaale xaruneed, ama Unug Badbaadada Bulshada.

## Kamera Ammaaneed

Toronto Community Housing waxay ilaalada hantidaada oo dhan u isticmaashaa fiidiyow korjoogtayn ah. Waxay ku caawiyaan dambi baarayaasha kadib markii dambiga laga war bixiyo. Kameradu waxay kale oo ka caawisaa sidii loo garan lahaa fal-dambiyeedka.

Kiraystayaalku waxay xaq u leeyihiin in ay rajeeyaan siinta kelinimo - aan la kashifayn - intii suurto gal ah. Waa in aan taas lala miisaamaa baahiyada ammaan. Waxaan kaamirada ku dhejinaa meelaha caamka ah ee Toronto



Hantida Guriyeynta Bulshada. Kuma dhejino meelaha ay suurto galka tahay in ay kiraystaalka, shaqaalaha iyo dadweynuhu ku cawro asturtaan. Tusaale, kamera kuma dhejino in ay fiiriso gudaha albaabo xiran ee qololka ama musqulaha ama qolqolka dhar badelashada.

Shaqaale loo awood siiyey keliya unbaa furi kara ama haleeli kara duubitaanada iyo kaydinaada kamerooyinka ilaalada. Askarta Toronto Police Adeega waa in lahi helaa in la sameeyo codsi rasmi ah si loo helo fiidyow la duubay hadii ay u baahan yihiin in ay baaraan dambi.

Nidaamka kumbuyatarka ayaa iskiis isaga tirtiraya fiidiyow la duubay marka la dhaaf mudada haynta ee uu nidaamkeeno ku cayimay. Haddii la soo sheego in uu duubitaankaasi yahay mid sharci ahaan loogu baahan yahay si loo dambi baaro ama arimo kale oo qaanuun ahaaneed, duubitaanka muddo dheer baa la hayaa, laakiin waa in la soo sheegaa inta aan la tirtiriin.

## Waxaad samayn karto

Kamerooyinkeena lama waardiyeeyo had iyo jeer, waqtiyada oo dhan. Waa muhim in aad sida ugu dhaqsaha badan ugusoo sheegto wax kasta oo dambi ah oo dhaca ama dhacdo iyaduna ka dhacday gudaha ama agagaafka dhismihiina, si ay shaqaaluhu u eegaan waxay kameradu duubtay oo u arkaan bal inay soo qabatay.

Booqo [torontohousing.ca/CCTV-policy](https://torontohousing.ca/CCTV-policy) oo ka sii bafro sida aan u isticmaalno, xifdino, hayno, kaydino, iyo usoo bandhigno fiidiyowiyada muuqaalka ah ee lagu qabtay ilaalada kamerada.

## Fal-fal - xumooyinka/anshax-xumida

Anshax-xumidu waa dabeecad ka soo horjeeda *Xeerka Kiraystayaasha* iyo nidaamkeenaba. Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah anshax-xumida:

- ficil kasta oo sharci darro ah, sida daroogo gadista
- fasaadka - in si cad loo jajabiyo hanti
- in halka ay dadweynaha u furan lagu joogo cabsanaan ama iyada oo cirka lagu jiro
- seero-goynimo ama lagu baagamuudeeyo ama lagu khamaaro derbi dadow
- in sigaar lagu cabo meel aan loo ogolayn
- ficil aan ammaan ahayn sida in la fuulo dabaqyada, lagu shido baaruudo, dabab la qabadsiiyo
- dabeecad ama dhaqan laga shakinayo, sida in lagu dhuunto ama gabado meel u dhow cid dadow gurigood ama la eegto ama la qooraansado gaari daaqadiisa
- in si macno la'aan ah loo daaro gambaleelka u qaylo dhamaiya dab-damiska
- in la ahaado mid qaylo badan



- in qashinka lagu daadiyo meel qaldan
- dabecad qashqashaad samayn ama gardaraysi ah, sida ku aabyoodka kiraytayaasha

## Maxaa dhici kara

Shaqaalaha Toronto Community Housing ayaa la shaqayn doona kiraystayaasha si ay uga hadlaan waxyaalaha dhaqan xumida anshaxa bulshada ah, iyaga ayaa ka kaalmaynaya waxay u baahdaan. Si kastab ha ahaatee, iyada oo ku xiran waxa ay samaynayaan, kiraystayaasha bulshada kula dhaqma siyaabo anshax xumi ah waxay:

- helayaan digniino qoraal ama oraah ah
- wejahayaan "sabab uga ka saarid" ay siiyaan Mulkiilaha guriga iyo Guddiga Kiraystayaashu (Landlord and Tenant Board)
- in la xiro ama la xukumo oo looga yeero maxkamad

## Waa maxay sabab uga saarid?

Sharciga iyo Nidaamkeena Sabab uga Saarid, dabecad anshax xumo ayaa noqon karta asalka guri ka saarid. Tusaalayaal dabecad ansaxh xumo ee gaarsiin keeni karta guri ka saarid waxaa ku jira qof:

- si is dabo joog ah u dhex gala xuquuqaha qof kirayste kale ah ee ah in ay si macquul ah ugu raaxaystaan gurigooda si nabadgelyo iyo xasilooni ah
- si ula kac ah u burburiya alaab/qalab
- galaan faldambiyeed sida hub isticmaalid ama daroogooyin gadis
- sameeyaan wax aan aamin ahayn ama dadka kale ka dhiga kuwo aan aamin ahayn


Waxaad ka mas'uul tahay dhaqanka iyo dabecadda qof kasta oo kula nool iyo weliba martidaada iyo soo booqdayaashaada. Hadday sameeyaan wax guri ka saarid sababaya, Toronto Community Housing waxay hirgelin kartaa guri ka saaridda qoyskaaga oo dhan.

## Waxaad samayn karto

- Si aad uga warbixiso dhaqan anshax xumo, wac Unugga Ammaanka Beesha **416-921-2323**
- Gal [torontohousing.ca/evictions-for-cause-policy](https://torontohousing.ca/evictions-for-cause-policy) si aad usii ogaato wax badan oo ku saabsan nidaamka guri sabab uga saarid
- Gal [torontohousing.ca/guest-policy](https://torontohousing.ca/guest-policy) si aad usii ogaato wax badan oo ku saabsan nidaamka Booqdaha iyo Martida

## Aqal isku wareejiyaalka

Aqal isku wareejiyaalku waxay dhacaysaa marka ay dadku joogayaan gurigaaga iyaga oo kaa dhigaya mid aan amaan dareemayn. Waxaa laga yaabaa in aad u baqayso jir ahaan ama maskax ahaan, ama aadba u baqayso lacagtaada.



Dad aan la rabin balse heli kara in ay guriga kiraytaha galaan iyaga oo saaxiib iska dhigaya, ama isticmaalaya tabooyin baqdin gelin ah si uu cansi geliyo. Kuwaasi waxay noqon karaan qof qoyska ka mid ah.

## Waxaad samayn karto

Toronto Community Housing waxay qofkaas aan la rabin dhaqaajin kartaa haddii la soo war geliyo oo keliya uun. Waan fahmaynaa in lay tahay cabsi in la noqdo mid dhibane u ah qof aqal isku wareejiye ah, laakiin waa muhim in laga soo war bixiyo si loo helo kaalmo. Aqal isku wareejiye waxa uu dib ka keeni karaa mushkilado intaa ka sii weyn. Iyada oo ay ku xiran tahay kolba waxa ka socda aqalka, kiraystaha aan ka soo gudbin war bixin aqal isku wareejiye waxa uu wajihi karaa ganaaxyo fal-dambiyeedyo, guri ka saarid ama sababid, ama labadaba. Ha isku khatar gelin in aad hoygaaga lumiso.

Markaad keento warbixin ku saabsan in aqalkaagii lala wareegayo, waxaan bixin doonaa hubinta fayoobaanta iyo taakulayno kale iyada oo xaaladana la xalinayo.

Haddii aad ka shakiso in ay dabaqaaga ka dhacayso aqal isku wareejin, waa in aad sidoo kale ka soo warbixisaa. Aqal isku wareejiyeyaalka waxaa loogu soo war gelin karaa:

- Unugga Badbaadada Beesha [416-921-2323](tel:416-921-2323)
- qaybta Adeegga Booliiska Toronto ee xaafadaada
- Crime Stoppers [416-222-8477](tel:416-222-8477) (TIPS)

## Ka hortagidda fal-dambiyeed ka dhaca deriska

### Qaabaynta Bii'ada

Marka ay Toronto Community Housing samayso dayactir weyn ama dib udhisid, waxaanu eegnaa jidad aan ku qaabayno derisyada xaafadaha iyo dabaqyada si ay u adkaato in ay lagu dhaqaaqo fal dambiyeed ama ficillo anshax xumo.

Tusaale, waxaan hubinaa in ay jidadku beelahaas isugu wada xiran yihiin, in aysan xirnayn. Waa in ay yihiin kuwo isku wareegga xaafadda laga haleeli karo in ka badan hal marin. Waxaan hubinaa in ay luuq luuqyada, wadiiqooyinka iyo meelaha baabuurta la dhigtaa ay leeyihiin nalal si wacan u ifiya. Markii aan dhisno, waxaan habsanaa in ay dariishaduha iyo baradooyinku yihiin kuwo laga daawna karo luuq luuqyada iyo baraha baabuur dhigashada.





## Waxaad samayn karto

Ku soco aagag nalal ka shidan yihiin oo leh marino kana fog duurarka. Wixii ah nal jaban ama nal baalle gubtay durba usoo sheeg Kormeeraha Guud ee guriga ama Xarunta Taakuleynta Macaamilka.

Haddii aad ku nooshahay guryaha isa-saarka ah, u daa nalka albaabkaaga in uu daarnaado habeenkii. Tani waxay ka caawinaysaa lugeeyeyaasha in ay wax arkaan waxayna niyad jebinaysaa wixii anshax xumo bulsho ah. Waxaad isticmaali kartaa guluubyada nalalka Waxtar-Tamareed illeen taasi raad weyn kuma reebi karto kharashka ay hayrdo kugu soo dallacaysee.

## Ka hortagidda fal-dambiyeed ka dhaca dabaqaaga ama guryahaaga isa-saarka ah

### Waxaad samayn karto

- Ku daa dhammaan albaabada gurigaaga inay xirnaadaan oo ay qataarnaadaan.
- Haddii uu gurigaagu ku yaallo dabaqa hoose ee guryaha isa-saarka ah, hubso in ay dariishadaaga iyo albaabaduba xiran yihiin amaana yihiin waqti walba.
- Weligaa ha ka tagin albaabada oo furan ama goyn dariiqyada iyo derbiyada jaranjarooyinka. Tani waxay xad-gudub ku tahay heshiiskii kirada iyo weliba furayaasha qaanuunada dabka.
- Raadi qiimeeye intaadan gudo gelin. Haddii aad dareento in aadan ku niyadsamayn, sug midka xiga.
- Hubso inaad taqaano qofka ka soo wactamaya interkomka intaadan u ogolaan in uu soo galo dhismaha dabaqa.
- Iska hubi dhammaan wax iibiyeyaalka, sida dadka wax dayactira, inay ku tusaan aqoonsi habboon inataadan u ogolaan in ay guriga soo galaan. Inay tahay dayactir degdeg ah mooyee, waxaad ugu yaraan 24 saac helaysaa ogaysiis soo gelitaan intuusan mid farsamayaqaan iibiye ihi soo gelin aqalkaaga.
- Qof aan aqalkaaga ku noolayn ha siinin nuqul ka mid ah furayaashaada ama ganjeel taabsiiskaaga.
- Haddii aad lumiso furayaashaada ama ganjeel taabsiiskaaga, usheeg kormeerahaaga guud isla markiiba ama wac Macaamilka
- Xarunta Taakulaynta hadii ay tahay saacado ammaan ah.
- Si xushmadi ku dheehan tahay, usheeg kormeerahaaga guud hadaad doonayso in aad maqnaato muddo dheeraad ah. Haddii ay dhismaha dabaqa



ka jirto xaalad degdeg ah, waxaa laga yaaba ainay u baahdaan inay xisaabiyaan dhammaan kiraystayaalka.

## Waxaad samayn karto

- Feejignooow marka aad usii socoto gaarigaaga. Maqal oo dhagsyso waxyaalaha ka dhacaya gagaaradaada.
- Haddii aad aragto qof aadan aqoon oo ku dabo socda, aaminimo muuji. Ku war geli dareenkaaga Unugga Badbaadad Beesha (Community Safety Unit) ama shaqaalaha aagga. Ku noqo gurigaaga oo hadhow soo noqo hadday aamin tahay.
- Mar kasta quful gaarigaaga hana uga tagin shayaalo muhim ah gudahiisa.
- Waxaan hubinaa in ay baraha baabuur dhigashadu leeyihiin nalal shidan. Haddii ay wax kaa khuseeyaan nalal shidnaanta ama aad rabto in aad ka soo war bixiso nal baalle oo jabay ama gubtay, la xiriir Xarunta Daryeelka Macaamilka.
- Baaskiilkaaga ka diinwaangeli askarta. Hadduusan lahayn lambar taxane ah, dhegta uga dhig lamabar. Taasi waxay tahay in aad ku sumadato baaskiilkaaga haddii la xado.
- Ku xir baaskiilkaaga wax aan la goyn karin ama la jabin karin. Beelo badan baa leh gaanjooyin baaskiil. Isticmaal quful tayo fiican leh.



## Ammanka dariishadda

Dariishada dhismaha dabaqyada ee Toronto Community Housing waxaa loo qaabeeyey qaab ammaan ah. Cayayaanka ka dulqaad shaashadaha dariishadaha gurigaaga. Laakiin uma ay adka ilaa xad ay ka celiyaan caruurta iyo dabjoogta inay ka dhacaan.

Xiritaanka dariishaduhu waxa uu dariishada siiyaa inay furnaato afar inji (10 sintimitir) si ay hawo nadiif ihi uga soo gasho, iyaga oo ammaankaagana dhawraya.



## Waxa loogu yeero daariishad dayactiro

Kormeerahaaga Guud ku soo wargeli wixii daariishad xiranta ah ama shaashado u baahan in la dayactiro. Waxaad kale oo ka la soo xiriiri kartaa Xarunta Taakulaynta Macaamilka [help@torontohousing.ca](mailto:help@torontohousing.ca) ama **416-981-5500**. Weligaa ha ku farogelin qfullada ama shaashadaha ama ha isku dayin inaad adigu hagaajiso. Haddii aad si ula

kac ah ugaraafayso quful ama shaashad, waxaa lagugu xukumi karaa in aad soo dayactirto. Waxay kale oo kuu soo jiidi kartaa in guriga lagaa saaro.

## Badbaadada Barandada

Haddii uu gurigaagu leeyahay barando, fadlan ku raaxayso. Laakiin xusuusnoow xukunada. Waxay yihiin badbaadadaada.

**Ha ba u** isticmaalin barandadaada bakhaar ahaan ama ha ka dhigan qol dheeri ah. Kani waa halis dabeed wuxuuna jebinayaa heshiiska kiradaada.

**Ha ka** tuurin waxyaalo barandadaada. Waxaas oo ay jiraan gumadyada sigaarku. Istimmaal haash-tariigga hubso in ay dhammaan qalabyada sigaar cabiddu meesha ka baxsanaadaan.

**Ha ba** dhigin barandada kaarbet. La jiranka khataraha, kaarbetyada qoyani waxay waxyeelayn karaan shamiitada.

**Ha ku** karin ama ku hilbo shiilan barandada. Kani waa halis dabeed wuxuuna jebinayaa heshiiska kiradaada.

## Sida loo waco barando dayactirayaasha

Ka wac Xarunta Daryeelka Macaamilka [416-981-5500](tel:416-981-5500).

## Korontada oo go'an

### Yaa loogu wacaa Korontada oo go'an

Haddii ay korontadu ka go'an tahay wadadaada bannaanka ah ama aad aragto khadadka korontada oo hoos u dhacay, ka wac Toronto Hydro [416-542-8000](tel:416-542-8000).

Haddii ay korontadu ka go'an tahay gurigaaga oo keliya laakiin ay nalalka surinada la maraa shidan yihiin, ka wac Xarumta Daryeelka Macaamilka [416-981-5500](tel:416-981-5500).

## U diyaar garow korontada oo go'da


- Kaydso dhowr toosh iyo baytariyo dheeraad ah.
- Isku day in aad dabka telifoonada gacanta iyo aaladaha kaleba aad u cabbayso.
- Kaydso raashino qasacadaysan iyo kuwo qalalan. Taariikhda ay dhacayaanse iska eeg weligaa.

Toronto Community Housing: Hagaha

- Hadaad cuuryaanimo qabtid, ka qaybqaado



ku  
oo



Ammaanka bulshada

habka Is-aqoonsiga oo buuxi foomka Xiriirka Degdegga ah iyo Macluumaadka Kaalmada Gaarka ah. Habraacani waxa uu u ogolaanayaa kiraytayaasha qaba caqabado meelo haleelid in ay si isku kalsooni ah isu sheegaan isuna baraan

Toronto Community Housing si ay u hubsadaan in ay ammaan yihiin inta lagu jiro xaaladda degdegta ah ee daadguraynta iyada oo loo marayo caawinta daadgureynta ama hubinta fayoobaanta.

- Bogga 21 aad ka sii baro wax dheeri ah oo ku saabsan hanaanka is-aqoonsiga.
- Haddii aad qaadato wax daawooyin ah oo ay tahay in faranjiyeerka lagu kaydiyo, hubso in aad meel qabow ku kaydsato.
- Wixii cillad koronto ah isla markay dhacaanba ku war geli shaqaalaha aagga ama Xarunta Daryeelka Macaamilka.

## **Waxa la sameeyo haddii ay dhacdo in ay korontadu go'do**

Nalalka degdegga ah iyo calaamadaha irdaha degdegga ah ee dabaqyada ayaa daarmaya ama si iskood ah isaga nuuraya markii ay korontadu baxdo.

Markii ay tahay xilliga saacadaha shaqada joogtada ah, shaqaalaha ayaa kuu sheegaya waxaad samaynayso. haddii ay korontada tagideedu tahay mid soconaysa in ka badan saddex saacadood, shaqaalaha aya aogaysiis so dhejinaya soona booqanaya aqalada. Waxay wadayaan in ay ku soo wargeliyaan oo hubiyaan baahiyadaada.

- Haddii aad qabto cuuryaanimo ama aad u baahan tahay kaalmo, durba ha ogaato Xarunta Daryeelka Macaamilku ama shaqaalaha aaggu.
- Hadaad wax karinayso, dami shooladda. Dabka ka saar furayaasha qalabka iyo korontada si aad uga fogaato kororka korontada, marka korontadu soo noqoto. Laamabadaha u daa ha isaga jireen dabkee si aad u garato in ay korontadii soo noqotay.
- Albaabka Tallaagadaadu ha xirnaado si uu raashinku qabow ugu sii jiro intaad awooddo.
- Isticmaal nalal gaaraabidhoodyo intaad shumacyo shidan lahayd. Haday tahay in aad shumac isticmaasho, ha ka tagin iyada oo aan qof ag joogin. Ka fogee caruurta ama dabjoogta, oo ugu yaraan hal tallaabo (30 sintimitir) ka fogee wax kasta oo dabkeeda qabsan kara.

## **Digniin:**

Weligaa—gudaha iyo baranada toona - ha ku kululayn kulayliyaalka kala ah borobayn, barbekuus, ama jeneratarada lagu xoojiyey gaaska. Waxay sii daayaan kaarboon gaas mono oksaydh ah oo dhimasho keena, kaas oo aadan arki karin ama urin karin.

La xiriir Toronto Hydro oo ka eeg [torontohydro.com](http://torontohydro.com) ama **416-542-8000** si aad u hesho akhbaarihii ugu dambeeyey ee koronto go'itaanka.

## **Daadgurayn**

Haddii uu dhaawac gaaray nidaamka korontada ee dabaqa, shaqaale ayaa kuu sheegi kara in aad cararto.

Ka qaado wixii daawooyin lagama maarmaan ah, warqado muhim ah, lacag, caddaymo aqoonsi ah.

Shaqaale ayaa kugu caawinaya dib u degitaanka iyo dib u soo noqoshada. Ha usoo gelin gurigaaga ilaa ay Toronto Community Housing kuu sheegaan in ay aamin tahay in lagu noqon karo.

## Markii ay korontadu soo noqoto

Ka fatash cuntada wixii hallow ah ee suurto gal ah. Markaad ka shakiso, iska tuur. Toronto Community Housing kuuma soo gudayso qiimhii raashinkii kaaga hallabay intii ay korontadu go'naayd.

Toronto Community Housing way qiimayn doontaa haddii ay jiraan wax dhaawac ama kharaab ihi ku dhaceen nidaamka korontada waxayna bilaabaya in ay dib u hagaajiyaan. Way kula socodsiinayaan kolba heerka ay u marayso dib u hagaajintu.

## Waxyeeelo biyo iyo daadad

Roobab xooggan ama cillad farsamo fuundi ayaa waxyeeelo biyo ku sababi karta dabaqaaga ama aqalkaaga. Daad qulqul ah ayaa dhici kara adoon waxba ogaan. Roob mahiigaan ah ayaa sababi kara in ay bullaacaduhu dib u soo butaacaan intay buux-dhaafaan.


## Waxaad samayn karto

Isla markii ay dhacaamba ku soo wargeli shaqaalaha aagga ama Xarunta Daryeelka Macaamilka wixii cillad farsamo fuundi ah ama saqaf kor ka soo darooraya ah, si loogu soo diro kan ku haboon. Haddii aad qabto cuuryaanimo ama aad u baahan tahay kaalmo, durba ha ogaato Xarunta Daryeelka Macaamilku ama shaqaalaha aaggu.

Haddii ay suurto gal tahay, dhammaan wixii qiimo leh sida qalabyada korontootinka ka qaad sagxadda si aad uga ilaaliso in uu daadku waxyeeleeyo.

Waxaa lagugu guubaabinayaa in aad barato meesha ay aqalkaaga uga yaallaan dhumaha tuubooyonka biyaha laga xiro, aad markaa u isticmaashid in aad ka xirtid biyaha soo galaya saxankaaga fooldhaqa iyo musqushaada lacalla haddii xaalad degdeg ihi timaado.

Haddii aay cuuryaanimo qabto, ka qayb gal habraaca is-aqoonsiga oo buuxi foomamka Xiriirka Degdegta ah iyo Toronto Communications Workgroup (Akhbaaraha





Kaalmooyinka Khaaska ah). Wax dheeri ah ka sii ogow ka qayb qaadashada habraaca is-aqoonsiga oo ka eeg [Bogga 21](#).

## **Markii uu daad dhaco**

- Ka soo wargeli Xarunta Daryeelka Macaamilka **416-981-5500**.
- Ka feejignow meelaha daadadka. Biyuhu wa akhagtar haddii ay taabtaan korontada qulqulkeeda, qalabyadeeda ama fiilooyinkeeda.
- Qalab koronto ha ku isticmaalin biyo agtood.
- Haddii biyo -gelintu saamayso, isticmaal biyo dhalo ku jira, la kariyey, ama la daweyay. Shaqaalaha ayaa kuu sheegaya marka ay aamin tahay in laga isticmaalo qasabadda.

## Daadgurayn

Haddii uu daadku gaarsiisan yahay heer khatar, shaqaalaha aya alaga yaabaa in ay kuu sheegaan in aad ka cararto aqalkaaga ama dabaqaaga.

Horay u qaado wixii daawo ah ooy tahay in qaadato, warqado muhim ah, lacag, iyo kaarar aqoonsi.

Shaqaale ayaa kugu caawinaya dib u degitaanka iyo dib u soo noqoshada. Ha soo gelin gurigaaga ilaa ay Toronto Community Housing kuu sheegto in ay aamin tahay in lagu soo noqdo.

## Daad kadib

Iska eeg kulli cuntooyinkaaga in ay yeesheen calaamado hallaabid ama waxyeellayno biyo. Marba hadaad ka shakiso, iska tuur, gaar ahaan haddii ay taabteen biyo daad ihi.

Daadkaku waxay abuuraan marxalado ay ku koraan caarooyin iyo cayayaano. Nadiifi oo jeermis-dil sagxadaha gurigaaga oo dhan adiga oo isticmaalaya qoyaan biyo warankiillo. Xusuuso in aadan weligaa caddayso ama warankiilo ku qasin amooniya ama nadiifuufiyeyaal illeen taasi waxay abuuri kartaa gaas sumaysane.

Ha isticmaalin qalabyo, xargo korontooyin, sanduuqyada laga daaro, ama kala jabiyaha salka fuyuuska ee uu daad keenay, ilaa kaa hubiyo oo kuu ansaxiyo koronto ku takhasuse. Toronto Community Housing ayaa kuu diyaarin doonta xaqiijinadaas.

Toronto Community Housing ayaa ku siinaysa jadwalka waxyaalaha loo baahan yahay in la dayactiro oo dhan oo weliba ku soo ogaysiinaysa kolba wixii ay tallabo hore usii qaadeen. Iyada oo ku xiran hadba inta ay la egtahay khatarta u gaystay daadku, qalab qallajiye ah sida marwaxado aalad warshadeed ayaa laga yaabaa in loo asteeyo meelaha uu daadku saameeyey. Haddii marwaxadahaas loo asteeyey aqalkaaga, waxaa lagu siinayaa ogeysiis ugu yaraan 24 saac intaan shaqaalaha ama iibiyuhu u imaanin si uu u habsado.

Toronto Community Housing kuuma soo gudi doonto wixii kaaga khasaaray daad dhacay. Kiraystayaalka ayaa laga rabaa in ay haystaan caymis uu ku jiro magdhawga dhibaatooyinka iyo khasaaraha ay daadadku sababaan.

## Udiyaar garowga xaaladaha degdegta ah

Toronto Community Housing waxay leedahay xaaaldo Degdeg

Qorshe Jawaabcelin si aan u habsano inaan diyaar u nahay waxyaalaha sida dab ka kaca hawada oo aad u

Toronto Community Housing: Hagaha




xumaata, iyo daadad. Si wax dheeri ah looga ogaado qorshaha, kala xiriir Xarunta Daryeelka Macaamilka  
[416-981-5500help@torontohousing.ca](mailto:416-981-5500help@torontohousing.ca).

## Waxaad samayn karto si aad diyaar u ahaato

Waa in aad leedahay qorshahaaga si adiga iyo qoyskaaguba aad u ogaataan waxay tahay in aad samaysaan marka ay jirto xaalad degdeg ihi. Isku layli sida adiga iyo caruurtaaduba aad uga tagi lahaydeen gurigaaga iyo dabaqaba idinka oo bedqab ah. Soo qabso meel ka baxsan dabaqiina halkaas oo qof kasta oo qoyskiina ihi uu din kula soo kulmi karo haddii aad is daadguraysaan.

Magacow qof aan idinla noolayn in uu ahaado kan lala xiriirayo haddii ay xaalad degdeg ihi timaado. Hubso in uu qoyskaagu ogyahay qofka uu yahay kan lala xiriirayaa iyo sida loola xiriiro iyaga.

Waa in aad u haysato caymis waxyaalaha gurigaaga si ay u bixiyaan wixii kaaga baaba'ay xaaladda degdegta ah sida dab ama daad.



## Soo buuxi foomka “Lacalla Haddii ay Xaalad Degdeg ihi ka Jirto”

Soo buuxi foomka “Lacalla Haddii ay Xaalad Degdeg ihi ka Jirto” kuna hayso meel laga arki karo oo aqalkaaga ah halkaas oo ay suurto gal tahay in ay ka arkaan kalkaalisoooyinka caafimaadka degdegga ihi inta uu dabku socdo. Ha iska siinin shaqaalaha Toronto Community Housing.


Foomkaani waa khayraad u fududaynaya baxnaaniyeyaasha caafimaadka in ay kaa caawiyaan haddii ay awoodaan in ay kua hadlaan haddii ay jirto jirro ama luuqad la'aani.

Garbadka dambe ee hagahaan waxa ah nuskhad ah foomka “Lacalla Haddii ay Xaalad Degdeg ihi ka Jirto” ee [boogga 49](#). Gooso oo soo buuxi. Way sahlan tahay in la akhriyee. Nuqulo dheeri ah ayaad la soo degi kartaa oo daabacan kartaa [torontohousing.ca/getprepared](http://torontohousing.ca/getprepared).

## Xir boorso “qabso oo tag”

Boorso “qabso oo tag” waa qalab degdeg ah oo lagu gurto wixii aad u baahan doontaan adiga iyo qoyskaaguba si aad dhaqso ugu baxdaan ama ugu yaraan 72 saacadood. Boorsadan ku hayso meel u dhow albaabka hore.

Boorsada waa in ay ku jiraan waxyaalo sida dhalo biyo ah, dhar la isku badesho, raashin ma hallabe ah, nalal biiiglayaal ah, iyo dawooyin dheeraad ah (haddii ay



suurto gal tahay). Ka sii baro wax dheeri ah, aad [torontohousing.ca/getprepared](https://torontohousing.ca/getprepared) ama [getprepared.gc.ca](https://getprepared.gc.ca).

Udiyaargaroobidda xaaladaha degdegta ah hadii aad qabto cuuryaanimo

Xaaladaha degdegta ihi waxay isugu jiri karaan, waxay noqon kartaa arin koronto, wiishash, qalab lagu haleelo gaadiid iyo waxyaalo kale oo badan.

Halkaan waxaa ah tallaabooyin aad qaadi karto si aad si wacan ugu diyaar garowdo:

- La samee qorshe caafimaad bixyahaaga, qoyskaaga, saaxiibadaa, ama kulli saddexdaba.
- Diyaari qof kaa soo war doona haddii ay xaalad degdeg ihi dhacdo.
- Qaado qalab caafimaad oo kuu digaya ama aalad kuu yeerinaysa gambaleel toosin ah.
- Haddii ay noloshaadu ku xiran tahay qalab caafimaad oo ku shaqeeya xoog koronto, sida neef-mareen sanaaci ah (ventilator) ama makiinada lagu sifeeyo wadnaha, samayso qorshe kaabitaan. Hubso in uu qalabkaagu weli sii shaqayn doono hadii ay awoodda koronto dhamaato.
- Kala xiriir Toronto Hydro **416-542-8000** si meel laguugu dhigo Diiwaanka Ogaysiinta Nolol Kaalmeeyaha (Life Support Notification Registry). Toronto Hydro waxay samaynayaan intii tabartood ah in ay ku ogaysiiyaan qorshaha loo dejiyey haddii ay korontadu go'do si aad u hesho waqti aad ku diyaar garowdo.
- Calaamadee qalabkaaga. Ku lifaaq tilmaamaha ku saabsan sida loo isticmaalo oo loo raro haddii ay qasab kugu noqoto inaad guurto.
- Ka qayb qaado habka Is-aqoonsiga oo buuxi foomka Xiriirka Degdegga ah iyo Macluumaadka Kaalmada Gaarka ah.



Haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah inta lagu jiro xaalad degdeg ah, waa inaad ka qaybqaadataa hannaanka Is-Aqoonsiga. Waxaad tan ku samaynaysaa adigoo buuxinaya foomka Xiriirka Degdegga ah iyo Macluumaadka Kaalmada Gaarka ah.

Hannaankan wuxuu u oggolaanayaa kiraystayaasha naafada ah inay si qarsoodi ah isu aqoonsadaan Toronto Community Housing. Ka jawaab celiyeyaasha koowaad iyo shaqaalaha goobta ayaa u isticmaali doona macluumaadka si ay u hubiyaan inaad hesho gargaarka aad u baahan tahay inta lagu jiro xaalad degdeg ah ama daadgureyn dhisme.



Nidaamkani gabi ahaanba waa ikhtiyaari waana qarsoodi, waxaana loola jeedaa in lagu badiyo foomka Xiriirka Degdegga ah iyo Macluumaadka Kaalmada Gaarka ah

wuxuu ku jiraa xirmada Dib -u -eegista Sannadlaha ah ee cutub kasta. Waxaad kale oo nuskhad ka heli kartaa khadka [torontohousing.ca/selfID](https://torontohousing.ca/selfID). Waxaad weliba la xiriir kartaa Xarunta Daryeelka Macaamilka si aad nuskhad u hesho.

U soo celi foomka kormeerahaaga guud ama Isuduwaha Adeegyada Kireysta ama Isuduwayaashaada Adeegyada Waayeelka (haddii aad ku nooshahay Unugga Guriyeynta Waayeelka iyo Habka Adeegga Isku -dhafan ayaa laga bilaabay gobolkaaga). Kormeerahaaga Guud ayaa ku

dari doona faahfaahin ka timaada foomka Qorshaha Badbaadada Dabka ee dhismahaaga si shaqaalaha ama jawaab celiyeyaasha ugu horreeyaa ay u ogaadaan sidii ay kugu caawin lahaayeen.

## Sidee buu foomkani uga duwan yahay foomka “Xaaladda Degdegga ah”?

Foomka Xiriirka Degdegga ah iyo Foomka Kaalmada Gaarka ah waxaa la siiyaa Beesha Toronto

Shaqaalaha guryeyntu si ay u ogaadaan inay kuu yimaadaan marka xaalad degdeg ahi timaado. Foomka “Lacalla hadii ay xaalad degdeg ihi dhacdo” waxa uu ka oollayaa aqalkaaga meel ay caafimaad baxnaaniyeyaalka degdegga ihi si fududu uga arki karaan. Waxaa ku jira macluumaad ay bixiyayaasha daryeelka caafimaadku u baahan yihiin haddii aysan kula soo xiriiri karin sababtoo ah jirro, dhaawac ama carqaladaha xagga luuqadda.

## Caymis

Waxaa lagaa rabaa heshiiskaaga kirada si aad u hesho oo u sii cusboonaysiiso caymiska alaabtaada. Tan waxaa la yiraahdaa caymiska waxyaabaha ku jira ama caymiska kiraystayaasha. Haddii qaybtaada ay waxyeello soo gaarto xaaladaha degdegga ah sida daad ama dab, caymisku wuxuu kaa caawinayaa inaad bixiso si aad u beddesho alaabtaada, oo ay ku jiraan alaabta guriga iyo qalab korontada/elektaroonigga.



aad

Caymisku wuxuu kaloo kaa caawin karaa bixinta kharashaadka sharciga - tusaale ahaan, haddii ficilladaadu dab dhaliyeen.

Caymisku wuxuu kaloo dabooli karaa kharashka joogitaanka hoteelka ama qaybta beddelka haddii aadan ku laaban karin qolkaaga xaalad degdeg ah awgeed.

## Caymiska la awoodi karo

Shirkadaha caymiska qaarkood waxay leeyihiin caymis u fudud kiraystayaasha inay bixiyaan guryaha bulshada. Hal ikhtiyaar waa Housing Services Corporation, oo leh Barnaamijka Caymiska Kiraystaha. Waxaad ka heli kartaa akhbaar ku saabsan sicirka kirada iyo caymiska [tenant.hscorp.ca](http://tenant.hscorp.ca) ama adoo waca **1-866-940-5111**. Sidoo kale shirkaaddii aad doonto ayaad ka iibsan kartaa caymis.

Dakhligaaga qaar ama dhammaantiis ma wuxuu ka yimaadaa Ontario Works ama Ontario Disability Support Program (Barnaamijka Caawimada Cuuryaanimada ee Ontario). Barnaamijyadani waxay dabooli karaan kharashka waxyaabaha caymiska ku jira. La hadal shaqaalaha xaaladaada haya si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.



Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan nooca caymiska adiga kugu habboon, wac Insurance Bureau of Canada (Xafiiska Caymiska ee Canada) **416-362-2031**.

# Badbaadada shimbiraha iyo xayawaanada

Kireystayaasha ayaa ka mas'uul ah dabeecadda xayawaankooda, sida buuqa, qaniinyada, iyo nadiifintooda. Adiga ayaa sidoo kale mas'uul ka ah xayawaanka guriga ku soo booqda ee hantidaada soo gelaya.

Xeerhoosaadka xayawaanka ee Caasimadda Toronto way xadidaa tirada iyo noocadda xayawaan ee aad ku haysan karto aqalkaaga.



Qodobka Heshiiskaaga Kiraystuhu (Residential Tenancies Act) waxa uu leeyahay qodobo qaanuun oo ku saabsan xayawaanka dabjoogta ah:

- Xaqiiji in xayawaan kasta uu xirto qoorta iyo sumadda aqoonsiga mar walba.
- Xayawaankaaga ku hay xadhig meelaha caadiga ah ee ka baxsan gurigaaga ama dibaddaba.
- Xayawaankaagu waa inuusan waxyeello u geysan hantida ama alaabta dadka kale.
- Xayawaankaagu waa inuusan noqon mid dhib badan ama dadka kale dhiba.
- Marnaba xayawaankaaga isaga oo keligii ah ha uga tagin barandadaada.
- Haddii shaqaaluhu soo galayaan qaybtaada si ay u sameeyaan dayactir ama dayactir, waa inaad si ammaan ah uga badbaadisaa dhammaan xayawaanka guriga ka fog halka ay ka shaqeynayaan.

## Xayawaanka iyo xaaladda degdegta ah

Haddii ay tahay inaad gurigaaga uga baxdo xaalad degdeg ah, ha ka tegin xayawaankaaga. Ama way lumi karaan ama way dhaawacmi karaan. Wixii faajfaahin dheeri ah oo ku taxaluqda sida loola dhaqmo xayawaanka xaaladda degdegta ah, kala xiriir

Toronto Animal Services [3-1-1](tel:3-1-1).

Toronto Community Housing ma bixin doonaan qiimaha xoolaha. Waxaa lagaa rabaa inaad haysato caymiska xayawaanka ama lacag kale si aad u ilaaliso una daryeesho xayawaankaaga ama xayawaanka adeega.



# Ammaanka dabka

Badbaadada dabku waa mas'uuliyad qof kasta saaran. Waxaad isku caawin kartaa in aad ammaan ku joogtid adiga oo raacaya jihaynada soo socda.

## Diyaar ohoow

Korka ka xifdi habraaca xaaladagha dgdegta ah hadduu dab ka dhaco dabaqaaga. Haddii aad ku nooshahay dabaq, macluumaadka ku saabsan waxa la sameeyo haddii dab dhaco ayaa lagu qeexay Badbaadada Dabka ee dhismahaaga Qorsheyso oo waxaa loogu yeeraa "Macluumaadka Degane". Waxay ahayd inaad hore u heshay nuqul ka mid ah qorshahan, laakiin waxaad nuqullo dheeraad ah ka heli kartaa Xarunta Daryeelka Macmiilka.



Baro qeybtaada, dhismaha ama qaabeynta guriga, oo ay ku jiraan dhammaan siyaabaha aad bixi karto.

Ka qaybqaado habka Is-aqoonsiga oo soo buuxi Xaaladda Degdegta ah iyo Kaalmo Khaas ah (Emergency Contact and Special Assistance)

Foomka macluumaadka haddii aad u baahan tahay gargaar marka ay jirto xaalad degdeg ah. Magacaaga waxaa lagu dari doonaa Qorshaha Badbaadada Dabka ee dabaqaaga si shaqaalaha ama jawaabceliyeyaasha ugu horreeya ay ogaadaan inay ku caawiyaan.


Mar walba xiriirkaaga ugu dambeeya soo sii Toronto Community Housing lacalla hadday noqoto in aad guriga ka baxdo dab dhacay awgiis.

## Qorshee marinkii aad ku fakan lahayd

Waxaad si fudud u abuuri kartaa dariiqaaga baxsiga adiga oo sawiraya sagxadda dhulka ee gurigaaga oo si cad u calaamadeeya meelaha laga baxo.

Ku tababar marinnada baxsashada xubin kasta oo ka tirsan qoyskaaga, oo ay ku jiraan carruur nooc kasta ah.

Toronto Community Housing: Hagaha



Go'aanso cidda mas'uul ka noqon doonta caawinta carruurta yaryar iyo xayawaanka rabbaayadda ah haddii ay xaalad degdeg ahi timaaddo.



## Haddii uu dab jiro

Ka bax aqalkaaga oo u soo xir albaabka, haddii ay aamin tahay taasi. Marna ha isticmaalin wiishka. Isticmaal meesha kuugu dhaw ee laga bixi karo. Haddii aad awoodi karto in aad bedqab ku bixi karto, sabab kasta oo dhacda ha istaagin ama ha aadin gadaal. Adeegyada Dabka ee Toronto ayaa kuu sheegi doona marka ay nabdoon tahay inaad dib ugu noqoto dhismahaaga.



## Haddii aad ku nooshahay dabaq dheer (in ka badan lix fooq)

In kasta oo meesha ugu nabdoon ee la joogo xilliga dabku ka baxsan yahay dhismaha, haddii qiiqu uusan soo gelin qaybtaada, waxaa ammaan kuu ah inaad joogtid oo aad sugto tilmaamaha shaqaalaha adeegyada gurmada. Waxay tegi doonaan guri -guri ama waxay adeegsan doonaan nidaamka isku -xidhka dhismaha.



## Maxaad samayn hadii aadan si aamin ah ku bixi karin

Haddii uu qiiq ama dab awdo dhammaan irdihii aad ka bixi lahayd, ama hadii aadan si fudud u qixi karin, iska joog aqalkaaga. Albaabka hore ha kuu xirnaado. Ku dabool dillaac kasta shukumaan qoyan ama go 'si aad qiiqa isaga dhowrto. Wac **9-1-1** si aad ugu sheegto Waaxda Dabka in aad aqlkaaga iska joogto. Ka rux barandada ama sur oo ka lalmi maro uu midabkeedu khafiif yahay ama daagada furan si aad u muujiso in aad caawimaad doon tahay haddii ay suurto gal tahay.



Haddii aadan xannibi karin qiiqa albaabka gurigaaga, dhig inta albaab ee u dhaxaysa adiga iyo albaabka hore. Tusaale ahaan, tag qolkaaga jiifka oo xidh albaabka si uu kuu dhex maro waddo iyo albaab u dhexeeya adiga iyo qiiqa.

## Haddii uu dabku dharka qabsado

Hayso wax fudud si aad u bakhtiiso ololka, sida buste ama shukumaan. Adiga ama qof kuu dhow ayaa u isticmaali kara inaad dabka damiso.

Haddii aad awooddo inaad dhulka tagto, dhulka ku rid oo ku duub buste ama shukumaan.



## Hadduu dab dhaco mar aad maqan tahay

Kala xiriir Xarunta Taakulaynta Macaamilka **416-981-5500** sida ugu dhaqsaha badab eed awoodo. Tani waxay shaqaalaha goobta ogeysiin doontaa inaad ammaan tahay oo lagu xisaabtami doono.

## Waxa ay Toronto Community Housing samayso intuu dab socdo

- Xarunta Daryeelka Macaamila ayaa ka war qaadaysa Unugga Badbaadada Beesha (Community Safety Unit) oo u gudbinaysa shaqaalaha aagga si loo caawiyo Adeegga Dabka ee Toronto.
- Adeegga Dabka ee Toronto waxay furaysaa sanduuqyada dabaqa ee Qorshaha Dab ka Badbaadista. Waxay haysaa liiska dadka u baahan in laga caawiyo daadgureynta. Waxaa laga yaabaa inay guri -guri u tagaan ama tilmaamaha war -baahinta ee intercom -ka.
- Unigga Badbaadada Beeshu waxay gacan ka geysataa samaynta goob sugitaan oo u dhow kiraystayaasha la daadgureeyey.
- Xarunta Daryeelka Macaamilku waxay shaqaalaha la socodsiisaa hadba wixii ku cusub dhacdada iyo jawaab celinteeda.

## Dab kabacdi

- La xiriir qoyskaaga iyo saaxiibadaada si aad ugu sheegta meesha aad joogto iyo sida uu xalkaagu yahay.
- Haday tahay in aad joogto meel ka baxsan aqalkaaga, Toronto Community Housing ayaa kuu sheegaysa khabarkii ugu dambeeyey iyo marba tallabada xigta. Waxay kaa caawin doonaan inaad gurto haddii loo baahdo ama aad aqalkaagii dib ugu noqoto hadduu aamin yahay.
- Ha gelin gurigaaga ilaa ay Toronto Community Housing kuu sheegto inay



- La xiriir caymis bixiyaahaaga. U sheeg iyaga dabka dhacay oo isla ogaada sida loo bilaabayo ka shaqaynta qaansheegadkaaga.
- Toronto Community Housing waxay qiimayn doonaan khasaaraha gaaray dhismaha. Dib u habayn waxay bilaabanaysaa markii aay aamin tahay in sidaa la yeelo. Toronto Community Housing ayaa mar walba ku soo wargelinaysa.

# Ka hortagga dabka

## Dab halisyada guriga


Isku buuqa badan wuxuu abuuraa khataraha dabka. Amaan ku joog, xakamee oo yaree isku-buuqa. Hubso inaad aqalkaaga ku leedahay luuq banaan ood ka baxdo.



Ha u isticmaalin barandada bakhaar ahaan. Alaabooyinka barandada kuu yaal ayaa xannibaya dariiqa loo baxsado si fudud ayuuna dab u qabsan karaa. Dababka barandada waa mid aad halis u ah maxaa yeelay badanaaba lama ogaado ilaa ay ka faafaan oo ay ka faraha baxaan in la xakameeyaan.



Heshiiskaaga kirada, waxaa lagaa rabaa inaad ogolaansho qoraal ah ka hesho Toronto Community Housing si aad u isticmaasho qayb kasta oo kululaynta oo dheeraad ah oo gurigaaga ah, oo uu ku meel kuleyliyuhu. Haddii aad isticmaasho kululeeyaha hawada, ka fogee ugu yaraan saddex tallabao (in ka badan hal mitir) wax kasta oo guban kara. Had iyo jeer si toos ah qalabka ugu xir darbiga.




jiro

Si xikmad leh u isticmaal xarkaha isku-dheeraynta iyo baararka korontada.


Qalabka korontada ee aadan isticmaalayn ka siib dabka si aad meel uga hesho kuwaad ugu baahan tahay; culeys ha saarina wax ka mid ah qalab koronto ku cabbaysi ah.

Marna ha ku qasbin xarig saddex-gees leh meel laba godad leh.



Dhammaan xarkaha korontada ha ku shubnaadeen karbetkaaga dushiisa, oo ha ka hoos marin. Xargaha ayaa ku waxyeeli kara karbet hoostiisa.

Waxyeelladaan aan la arki karin waxay xarigga ka dhigi kartaa mid aad u kululaata oo dab kiciya.



Isku buuqa badan wuxuu abuuraa khataraha dabka. Amaan ku joog, xakamee oo yaree isku-buuqa. Hubso inaad aqalkaaga ku leedahay luuq banaan ood ka baxdo.

## Cunto karis taxadar la'aan ah

Cunto karintu waa sababta ugu weyn ee dhalisa dab ama dhaawaco dab la xiriira ee guriga gudihiisa. Ku xifdiso meel ammaan ah talooyinkaan soo socda.


Ka fogee waxyaabaha dabka ka qaadi kara qalabka wax lagu karsado, sida foornada, shooladda, microwave -ka iyo kuwo kale. Tusaale ahaan, ka ilaali baakadaha cuntada, shukumaannada, makiinadaha foornada, iyo maacuunta alwaaxda ah marka aadan isticmaalaynin.



Maacuuntaada cunto karis ha kuu ahaadeen nadiif. Kuwaas waxaa ka mid ah foornada, shooladda dusheeda, mikrowave, iyo toasterada. Cuntada iyo qoyaankuba aad bay dambka u qabsan ogyihiin, siiba dufanku.



Marnaba inta aad karinayso ha ka tegin shooladaada oo dabka saaran iyada oon qofna la joogin. Haddii aad u baahan tahay inaad ka baxdo jikada, dami dabka oo dhaqso uga dhaqaaji waxyaalaha kulul dheriyada iyo digsiyada.



Mar walba si toos ah ugu xir qalabka wax lagu karsado derbiga.

Ha isticmaalin wax qalab ah haddii xargii korontadu dillaacay ama dhaawacmay - tani waa halis dabeed.



## Maxaa la sameeyaa haddii uu dab jikada ka kaco

Haddii uu dab uu sababay dufani bilowdo, marna ha isticmaalin biyo si aad u damiso. Biyuhu dabka dufanka way uga sii daraan.

Haddii aad si ammaan ah u samayn karto, ku dheji daboolka dheriga ama xaashida buskudka digsigu si aad dabka u damisid. Dami shoolad shidaha ama gubaha. Ha dhaqaajin digsigu. Daboolka udaa ha saarnaadee ilaa uu digsigu qaboobo.




Ka feker inaad iibsato ABC (ujeeddo badan) dab-bakhtiye si aad ugu sii haysato jikadaada.

Haddii ay foornadaada dab ka kaco, demi iyada. Albaabka foornadu ha xiraanado. Udaa in ay alaabaha iyo meelaha oo dhani qaboobaadaan.

Haddii holac ka soo baxo foornada ama dabka aan si fudud loo damin isla markiiba, ka tag gurigaaga oo albaabka si adag ugu xir. Soo jiid gambaleel dab-digaha kuugu dhow. Ka wac **9-1-1** isla markiiba adoo jooga meel aamin ah.

Toronto Community Housing: Hagaha



## **Xeerka Cusub ee "sigaar laguma cabi karo"**

Toronto Community Housing waxay horay ugu sii siqaysaa in ay fuliso xeerka ku qoran hantiyadeena ee ah "sigaar laguma cabi karo". Kireystayaasha saxiixay heshiiska kirada kadib marka uu xeerku dhaqan galo waxay u baahan doonaan inay raacaan xaddidaadaha sigaarka sida ku qeexan heshiiskooda.



Kiraystaha saxiixay heshiiskooda ka hor intaan siyaasadani dhaqan gelin waxay weli awoodi doonaan inay ku cabbaan gudaha qolkooda iyo barandada ilaa iyo inta aysan samayn:

- In ay dad kale oo dabaqa ku dhibaano
- Abuuraan xaalad khatar ku ah dadka kale ee jooga dabaqa

Xaaladahaas oo dhan, sigaarka looma ogola meel kasta oo ka mid ah dhismaha (derbiyada jaranjarooyinka, marinada caamka ah, garaashyada iyo wax ka badan) ama sagaal mitir gudahood marka laga soo galo dhismaha.

## **Sigaar cabidda aan loo aabba yeelin - laga taxadarin**


Sigaar cabidda aan laga taxadarin iyada oo guriga la joogo waa tan ugu horeysa ee keenta qarxitaanka dab dhimashooyin sababa . Sigaarka hoos u dhacay ayaa qiiqi kara saacado ka hor inta uusan ku dhicin holac/olol.

Meesha ugu ammaansan in sigaar lagu cabo waa bannaanka.


Markaad dibadda ku cabayso, waa inaad ugu yaraan sagaal mitir (qiyaastii 30 tallaabo) u jirsataa albaabka laga soo galo ama laga baxo. Waxaa kugu dhici ama wajihi kartaa ganaax loo cuskanayo xeer-hoosaadka caasimadda haddii aad sigaar ula dhowdahay dhismaha.



Marna baranadada ha ka tuuriin sigaar gumadkiisa. Dababka ka kaca barandooyinku waa kuwa ugu khatarsan. Taasi waxay tahay in ay gubasho bilaabi karaan oo hadana faafi karaan iyada oo aan la ogaanin.




Isticmaal haashtarik hoos u qodan una adag. Hubi in sigaarka iyo agabyada kale ee sigaarku ay dhammaadeen - ha uga tegin iftiin ama qiiqa sigaarka oo aan lala socon. Ka fogee hashtariga wax kasta oo ku gudba kara. Mar kasta banaanee.



Ka fogee waxyaalaha qiiqa meelaha la gaari karo. Bar carruurta in kabriidka iyo dab shideyaashu aysan ahayn alaabta carruurta ku ciyaarto, oo ay tahay inay isla markiiba u sheegaan qof weyn haddii ay arkaan qalab sigaar lagu cabbo.



Sigaarka E- ah waxa uu bilaabi karaa dab. Tani waxay dhici kartaa inta aad isticmaaleyso ama markaad batteriga ku shubaneyso. Xattaa waxay dhici kartaa marka aad iska sidato. Marna ha uga tagin E-sigaar koronto ku cabbaysmaya oo aan qofna ag joogin ama habeen yuusan ku baryin isaga dabka oo korontada qaadanaya.



Ha cabin sigaar adiga oo daandaansan ama haddii aad aalkolo/khamro cabayso. Marna sariirta ha ku kor cabin.




Haddii aad isticmaaleyso ogsijiin caafimaad ama gaas kasta oo kale oo la cadaadiyey, ha u ogolaan qofna inuu sigaar ku ag dhigo ama u dhow meesha aad ku kaydiso.



## Shumacyada


Shumacyadu waxay noqon karaan kuwo khatar u ah in ay dhaliyaan dab halis haddii aan si habboon loo isticmaalin. Waxaa jira tirooyin talooyin ah oo aad ku yarayn karto khatarta marka aad shumac gubayso ama daarayso.

Isticmaal shamac adag oo ammaan ah oo aan guban ama talaalo yeelan. Ha ku darin shumacyo sariiraha, musqulaha, ama meelaha la seexdo. Afuuf durba marka aad ka baxayso qolka ama aad seexanayso.






Ku hay shumacyada, taraqayada, iyo wallaacadaha meelo fog xayawaanka iyo caruurta.



### Usamee meelo banaan

Shumacyada shidan ugu yaraan 12 inji (30 cm) ka fogow waxyaabaha dabka qaadi kara, sida daahyada iyo qurxinta ayaamaha fasaxa ama bandhigyada.



### Hubso in uu dansan yahay

Si fiican oo loo hubsado in u shumac uu si buuxda udansan yahay waa in la qooyo afkiisa caaradda ah. Sidaas oo kale waxaad ku samayn kafirtaa taraqa marka aad afuufto kadib.



### Dooro khayaar kale

Ku fikir in aad baddelkeeda isticmaasho shumacyo aan holcaynin.



## Ku hay gambaleelkaaga qiiqa xaalad xaqiijinaysa in uu shaqayanayo.

Gambaleelkaaga qiiqu waxa uu kuu badbaadin karaa naftaada. Qiiqu dhaqso ayuu u faafaa. Gambaleelka qiiq ka digaha ihu wuxuu ku siinayaa digniin hore, si aad si nabad ah uga baxsato dabka.

Waxay ahayd inaad hore u heshay nuskhad ah buugga digniinta qiiqa. Buug gacmeedku wuxuu kuu sheegayaa sida qaylo -dhaanta dabku u shaqeeyo ama loo isticmaalo iyo sida loo tijaabiyo. Hadaad u baahan tahay nuskhad gacmeed kale oo gambaleelka dabka ah, la xiriir Xarunta Taakulaynta Macaamilka.


## Tijaabayn joogtayn ah

Shaqaalahaheenu waxay hubiyaan in qaylo -dhaanta dabkaagu shaqaynayso markay soo booqdaan qaybtaada ka qayb ah habka kormeerka cutubka sannadlaha ah. Qudhaadu waa in aad bil walba tijaabisaa gambaleelkaaga dad digaha ah. Riix badhanka tijaabada oo dhegayso qaylo dhaantiisa. Haddii uusan gambaleelka digaha qiiqu uusan shaqaynayn, isla markiiba u sheeg shaqaalaha aagga, ama xiriir Xarunta Taakulaynta Macaamilka.



## Ka hortag gambaleel digayaasha beenta ah

Gambaleel-digaha qiiqa waa in lagu rakibaa meel ka fog shoolada. Haddii aad si soo noqnoqod ah u helayso digitaano gambaleel marka aad karinayso, la hadal kormeerahaaga guud. Digahaaga qiiqu waxaa laga yaabaa in uu u baahan yahay in la qaado. Markii aad hesho digniin gambaleel oo been ah, waxaa jira badhan “hash” ah aad riixi karto. Taasi waxay ka joojinaysaa in uu cod sameeyo tan iyo intii muddo ah inta ay hawadu ka noqonaysa nadiif.




## Dhegool ama dhegojige?

Waxaa jira aalad qiiq kadigid ah oo gaar ahaan laguugu qaabeeyey. Haddii aad mid u baahan tahay, u sheeg kormeerahaaga ama Isuduwaha Adeegyada Kiraystaha ama

Isuduwaha Adeegyada Waayeelka (haddii aad ku nooshahay Unugga Guryeynta Waayeelka iyo Habka Adeegga Isku -dhafan ayaa laga bilaabay gobolkaaga).

Ha carqaladayn qiiq ka digahaaga

Waxaad khatar gelinaysaa naftaada, tan qoyskaaga iyo tan deriskaagaba. Waxay ka soo horjeedaa sharciga in la carqaladeeyo, la cuuryaamiyo, ama laga qaado meeshiisa qiiq ka dige. Waxaa lagugu xukumi karaa in aad soo kabto, ganaax lacageed oo gaaraya \$100,000, ama waxaad wejhi kartaa in guriga lagaa saaro.



## Rukumada calaamadeed ee halista dabeed ee ku yaalla meelaha caamka ah

Goobaha guud ee meelaha caamka ah ee dabaqaaga, sida marinada, irdaha ka bixitaanka, iyo derbiyada jaranjarooyinka, waa inay u ahaadaan meel aamin u ah qof walba. Ku xifdi meel ka xor ah halisaha.

## Marinada dadka oo keliya ayaa loogu talo galay

Mar kasta banee marinada iyo irdaha looga baxsado khatarah degdeta ah. *Ontario Fire Code* waxay siisaa shaqaalaha awoodda ay ku dhaqaajiso wax kasta oo dab quudin kara ama awdi kara jidkii laga baxo.

Laguuma soo celinayo haddii hantiyadaada laga qaado ama la tuuro. Sheyaalka laga xaaraantimeeyey in ay yaallaan, albaabka, marinada guud iyo irdaha, waxay isugu jiraan balse aysan ku ekayn:

- Albaab sharaxaad ama laga soo laadlaadiyeyaal, oo ay ku jiraan sharaxaadaha faystooyinku
- Ubaxyo (bac ama mid run ah)
- Darin albaabeedyo
- Ubaxyada faystooyinka ama geedaha
- Baaskillo
- Kaariyoonayaal



## Albaab xirani waa albaab ammaan ah

Albaabadu waxay kaa caawiyaan in ay celiyaan qiiqa iyo dabka. Albaabada u dhexeeya aqalka iyo marinka guud ee dhismayaashu waa kuwa dabka lagu qiimeeyo, taas oo macnaheedu yahay inay iska caabbbin karaan kulaylka iyo oolka waqti cayiman. Had iyo jeer ku hay albaabka gurigaaga iyo albaabada jaranjarada xirnaan dhammaystiran.



## Qashinku wuxuu aadaa barta qashin qubka

Ka dhig meelaha qashinka lagu nadiifiyo, kuwo ay albaabadoodu u xiran yihiin, aagga ku xeeranna hagaagaan yahay. Nadiifi, ka shaqaynta barta qashinqubka iyo albaabadoodu waxay yareeyaan khatarta dabka.



## Ku hay derbiyada jaranjarada kuwo qayaxan/aan qarsoonayn

Waligaa waxyaalo ha uga tagin jaranjarada ama ha ku xidhin jaranjarada si kasta ha ahaatee. Waa inay ahaadaan kuwo nabdoon oo qayaxan mar walba si loogu ogolaado dadka inay si ammaan ah uga baxaan dhismaha inta lagu jiro xaalad degdeg ah.



Badbaadada dabku waa mas'uuliyad qof kasta saaran. Gal [torontohousing.ca/firesafety](https://torontohousing.ca/firesafety) faahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan sidii dabka looga hortagi lahaa iyo talooyin ammaan ah.



# Badbaado xilliyeed

Mararka qaarkood ee sannadka, isbeddelka cimiladu wuxuu ku keeni karaa xoogaa walaac ah xagga ammaanka. Baro waxa aad samayn karto si aad ugu joogto si ammaan ah.

## Ammaanka Xilliga Kulaylaha

### Gubashada banaanka

Wac **3-1-1** haddii ay baaruudo ka jiraan agagaarkaaga

Baaruudaha iyo dababka habeen dhaxa waqtina looma ogola in lagu shido meel ka mid ah hantida Toronto Community Housing. Waxay guryaha ku sababi karaan daqarro, dabab, iyo dhaawacyo.




### Si taxadar leh banaanka u dhig

Had iyo jeer isticmaal weelka qashinka ama weel mug dheer adag oo dabool leh si aad u tuurto sigaarka. Ha ku tuurin cawska, duurka, ama barandadaada.



### Daxadar ku jir marka aad shiilanayso

Shiilashada iyo dubashada looma ogola barandooyinka. Toronto Community Housing waxay ogolaataa in wax lagu dubto meelaha dabaqyada ka baxsan ee banaanka ka ah. Ka hubi kormeerahaaga si aad u ogaato in la ogol yahay in wax lagu dubto meel kasta oo dhismahaaga ah. Ka ilaali dubista ugu yaraan 4.5 mitir (qiyaastii 15 fuudh) dhinacyada dhismayaasha iyo wax kasta oo guban kara. Ka saar taangiyada borobyn -ka marka aysan isticmaalin. Si ammaan ah kor uga qul.







## Maxaa la sameeyaa haddii uu dab qabsado dhar/dhaaraan

Hadduu dab qabsado dharkaaga, staag, siib kulligiis oo islu laab.

Ha ku ordin meelaha. Jooji waxaad samaynayso, dhulka ku soo tuur oo wejigaaga ku dabool gacmahaaga. Kadibna horay iyo gadaal u rog ilaa dabku daminayo.

Haddii aadan joojin karin, tuurin oo duubin, adiga ama qof kuu dhow ayaa isticmaali kara dhar ama maro (jaakad ama buste) si aad dabka u damisaan.




## Qaboobaan ku joogid kulaylka

Toronto Community Housing ayaa dabaq kasta u badesha nidaamka kulayliyaha mid qaboojiye ah inta lagu jiro xilliga kulaylaha. Haddii aad dhibaato ka qabto heerkulka qaybtaada, la xiriir Xarunta Daryeelka Macaamilka.

Il qooraadyadaada ama daahyadaadu ha xirnaadaan maalintii oo dhan si aad qorraxda isaga aawdo. Demi nalalka oo ka fuji qalabka aadan markaa isticmaalaynin. Waxay bixiyaan kuleylka xitaa marka aysan isticmaalaynin.

Kaalmaatigu ma qaboojiyaan hawada -way iska wareejiyaan. Ku afuufidda hawo diirran oo dhab ah waxay dhab ahaantii sababi kartaa kulaylka si dhakhso ah. Furaha ayaa ah in biyo cabista la joogteeyo. Biyo badan cab, xataa haddii aadan oon dareemin.



## Digniin Kulayl

Bii'ada iyo Isbedelka Cimilada Kanada waxay soo saartaa digniino kuleyl ah maalinta heerkulku gaaro 31C ama ka diiran, iyadoo habeenku ka hooseeyo 20C ama kululeeyo, laba maalmood ama ka badan oo isku xigta.

Waxa kale oo jira digniino marka ay aad u qoyan tahay, oo leh humidekis qiimaha 40C ama ka sarreeya laba maalmood ama ka badan oo isku xiga.


Qaar ka mid ah dhismayaasha Toronto Community Housing, shaqaaluhu waxay dejiyaan qol qaboojin marka ay jirto digniin kulayl. Shaqaalaha ayaa dhejin doona ogeysiis ku saabsan qolka qaboojinta.

Haddii dhismahaagu aanu lahayn qol qaboojiye, ogeysiiska ayaa kuu sheegi doona meesha ugu dhow ee ah goob dadweyne oo hawo leh. Waxaa kale oo wici kartaa **3-1-1** ama gali kartaa [toronto.ca/cool-space](https://toronto.ca/cool-space) si aad u hesho meel qabooban ee kugu dhow.

## Qaboojiyaha ammaansan

Hawada qaboojiyaha dabaqa ah oo keliya ayaa loo ogol yahay qaybtaada. Qaboojiyeyaasha daaqadaha lama ogola.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan qaboojiyahaaga, fadlan weydii kormeerahaaga ama wac Xarunta Daryeelka Macmiilka ee **416-981-5500**.



## Ammaanka berkadaha dabbaasha

Qaar ka mid ah dhismayaalka Toronto Community Housing waxay berkad dabbaal gudaha ku taallo. Kuwani waxay u furan yihiin kiraystayaasha dhismaha sannadka oo dhan. Waxa kale oo jira barkado dabaasha oo ku yaal qaarkood hantida Toronto Community Housing.

Kuwani waxay u furan yihiin xagaaga dhammaan kiraystayaasha Toronto Community Housing, ma aha oo kaliya kiraystayaasha beeshaas.



## Akhri xukunada

Berkadaha oo dhami waxay leeyihiin xukuno loogu dhejiyey sababo caafimaad iyo badbaado awgood. Hubso aad xaqiiqsatay inaad taqaanid xukunada intaadan isticmaalin berkadda. Tusaale ahaan, carruurta ka yar 10 sano waa inay la joogaan qof weyn mar walba barkadda gudaheeda ama agteeda.



## Casharo dabaaleed

Waxaan inta badan siinaa casharo dabaasha ah dhammaan kireystayaasha isticmaalaya barkadahayaga. Ka hubi ilaaliyaha goobta si aad u ogaato haddii casharro dabaasha oo lacag la'aan ah la heli karo. Waxaad iska qori kartaa ilaaliyaha goobta maalinta furitaanka barkadda.

## Digniin kulayl - berkado furan muddo dheer

Markii digniin kulayli jirto, Toronto Community Housing inay kordhiso waqtiga berkada ayaa laga yaabaa. Hadaad qabto waxa su'aalo ah oo ku saabsan saacadaha berakadda, la hadal badbaadiyaha nafeed ee shaqada ku jira.

**Gal [torontohousing.ca/becoolandsafe](https://torontohousing.ca/becoolandsafe) Faahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan ka raynta kulayka xilliga kulaylaha iyo waxa la sameeyo markii ay jirto digniin kululaansho.**

## Badbaadada xilliga qaboobaha

Toronto Community Housing waxay mas'uul ka tahay samaynta inau xaqiijiyaan in aqalkaagu oo gaarsiisan yahay ugu yaraan 21 digrii xilliga bilaha qaboobaha. Haddii aad dhibaato ka qabto heerkulka qaybtaada, la xiriir Xarunta Daryeelka Macmiilka.

## Digniino cimilo si xad-dhaaf ah u qabow

Kuwaas waxaa la sii daayaa marka ay jirto saadaalin hawo oo ka hoosaysa 15C ama ka qabow, ama dabayl dhaxan leh oo ka hoosaysa 20C or ka sii qabow.

Raac talooyinkan si aad u ahaato mid diirran oo ammaan ah inta lagu jiro duufaanka qabowga daran ama jiilaalka:

- Haddii ay suurtoagal tahay, cuntada iyo daawooyinka dheeraadka ah gacanta ku hay haddii aanad awoodin inaad dibadda u baxdo.
- Haddii aad ku nooshahay guri leh kuleyl koronto, dhammaan qasabadaha dhig faleebo tartiib ah. Tani waxay ka caawisaa ka hortagga dhuumaha inay barafobaan oo ay waxyeelleeyaan.
- Haddii kulaylku baxo, u sheeg shaqaalaha goobta ama Xarunta Daryeelka Macmiilka isla markiiba. Haddii kulaylku baxo inta lagu jiro digniin qabow oo aad u daran, Toronto Community Housing waxay dejin doontaa meel kululaanaysa oo ku taalla aag caadi ah ilaa kulaylku dib u soo noqdo.




Digniin: Ha u isticmaalin foornadaada, kululeeyaha propane, barbecube, ama matoorrada gaaska ku shaqeeya si aad u kululayso qaybtaada. Waxay sii daayaan kaarboon gaas mono oksaydh ah oo dhimasho keena, kaas oo aadan arki karin ama urin karin.

Gal [torontohousing.ca/safe\\_winter](https://torontohousing.ca/safe_winter) si aad uga hesho talooyin hoosaad babn oo ku saabsan badbaadada xilliga qaboobaha.

## Kulayliyeyaal la qaadan karo (space heaters)

Haddii aad ogolaansho qoraal ah ka haysato Toronto Community

Housing si aad u isticmaasho kululeeyaha booska la qaadan karo, hubi inay leedahay sumadda Ururka Heer Martabeedka Canada (Canadian Standards Associations - CSA). Ka fogee dhammaan kululeeyayaasha ugu yaraan hal mitir (saddex tallaabo) wax kasta oo guban kara, sida warqadda,



daahyada, dharka dabacsan, alaabta guriga, gogosha, iyo gidaarka. Mar walba ka ilaali carruurta iyo xayawaanka guriga kuleyliyaha.


Marna ha kor saarin kuleyliyaha dhar ama gogol si aad u qalajiso marka la isticmaalayo, maadaama alaabtan ay si fudud dab u qabsan karaan.

Ha ka tegin kuleyliyaha markaad guriga ka baxdo ama aad seexato.

## Radiyaytarada

Cimilo qabow oo aad u daran ayaa ka dhigi karta radiyaytarada inay qarxaan.

Tani waxay adiga iyo deriskaagaba idinku keeni kartaa daadad iyo waxyeellayno. Haddii uu radiayorkaagu qarxo, wac **416-981-5500** iska markiiba.



## Talooyin looga hortago in uu kuleyliyahaagu qarxo ama dillaaco

- Daaqadahaaga xir si aad uga hortagto in hawo qabow soo gasho gudaha. Hawada qabow waxay qaboojin kartaa biyaha gudaha kuleyliyaha, taasina waxay ka dhigtaa inay dillaacdo.
- Hubi in kuleyliyahaagu uusan qabow xagga sare ka hooseyn. Tani waxay dhacdaa marka ay jirto hawo xannibani. La hadal shaqaalaha goobta ama Xarunta Daryeelka Macaamilka. Waxay diyaarin doonaan in sida ugu dhakhsaha badan hawada loo sii daayo.
- Hubi in alaabta gurigaagu ugu yaraan 15 cm (qiyaastii lix inji) u jirto kuleyliyaha. Haddii kuleylihaagu uu xiray alaabta guriga ama daahyada culus, hawo diirrani ugama faafi doonto qeybtaada sidii la rabay.
- Marna adigu ha usku deyin in aad hagaajiso radiyayeytarka. Haddii uu aqalkaagu aad u qabow yahay ama aad u diiran yahay, la hadal shaqaalaha aagga ama ka wac Xarunta Taakulaynta Macaamilka **416-981-5500**.

## Roob barafayn ah, baraf dhegan, iyo ceeryaamo

Roob qabow iyo dabaylo xoog leh ayaa dhaliya korontada oo go'a marka geedaha ay ku dhacaan xargaha korontada. Eeg **Bogga 15** tallooyin ku saabsan waxa la samaynayo inta ay korontadu maqan tahay.

## Ohow mid wacyigalsan

Daawo oo dhagayso warbaahinta maxaliga ah si aad u hesho warbixinnada cimilada, cusboonaysiinta xiritaanka



waddada ama gaadiidka, iyo farriimaha kale ee degdegga ah. Shaqaalaha Toronto Community Housing ayaa iyaguna kula soo xiriiraya haddii ay hawada qaboobuhu waxyeelaysay dabaqaaga.

## Gudaha joog

Roob barafaysan iyo baraf isfuulfuulay ayaa ka dhigi karaa socod-lugeedka, waddooyinka dhinaceeda, iyo jidadku in lagu simbiriirixdo ilbidhiqsiyo gudahood. Haddii aad awooddo, gudaha joog ilaa inta laamiga iyo waddooyinka laga cusbeynaayo oo la nadiifinayo.

Shaqaaluhu waxay ka saari doonaan barafka iyo dhededa 12 saacadood gudahood marka barafku da'o. Waxaan sidoo kale ku firdhin doonaa milix ama ciid waddooyinka lugaynta, waddooyinka baabuurta, jaranjarooyinka dibadda, iyo meelaha baabuurta la dhigto ee bannaanka haddii loo baahdo. La xiriir Xarunta Daryeelka Macmiilka si aad u soo sheegto meelaha sibiibixsan ama barafka ah ee ku yaal dhismahaaga dhismaha.

## Badbaadada Dabaysha

Cimilada aadka u darani waxay keeni karaan dabaylo sareeya. Ku xafid waxyaabaha dabacsan barandadaada ama deyrkaaga. Haddii alaabtaadu ay dabayshu gadaal u rogto, waxay dhaawici kartaa adiga iyo deriskaaga.



## Badbaadada Holloween

Khayaano ama macaamil waxay noqon karaan madadaalo, laakiin sidoo kale waxay noqon kartaa khatar. Haddii aad doorato inaad ka qaybgasho hawlaha Halloween, waalid ama qof kale oo mas'uul ah waa inuu had iyo jeer la joogaa carruurta yaryar.

Caruurtaadu waa in ay qaataan telfoonka gacanta hadii ay suurto gal tahay. Haddii aad aragto wax kasta oo laga shakiyo ama sharci darro ah, isla markiiba wac askarta.



Gal [torontopolice.on.ca/safetyzone](https://torontopolice.on.ca/safetyzone) faahfaahino dheeraad ah oo ku saabsan talooyinka badbaadada Halloween, sida kastuumooyinka nabdoon iyo shisheeyaha khatarta ah.



## **Isbeddel madadaalo ah oo lagu khiyaaneeyo ama lagula macaamilo**

Halkii aad guri ka guri u tagi lahayd, raadi meelaha sida xarumaha bulshada ee martigeliya dhacdooyinka gaarka ah ee Halloween. Ama u diyaari munaasabaddaada carruurtaada iyo saaxiibbadood.

# Miyaad u baahan tahay nuskhad la tarjumay?

Qoraa kaanu waxaa uuka kooban yahay akhbaar muhiim ah oo loogu talo galay Toronto Community Housing 416-981-5500. aad jeclaan lahayd inaad hesho nuskhad ka mid ah hagahaan, wax 416-981-5500.

تتوفر النسخ المترجمة عند الطلب.  
يرجى الاتصال على الرقم ٤١٦-٩٨١-٥٥٠٠

Przetłumaczone kopie dostępne są na prośbę.  
Prosimy zadzwonić 416-981-5500.

ভাষান্তরিত প্রতিলিপিগুলি অনুরোধ করলে পাওয়া যাবে।  
৪১৬-৯৮১-৫৫০০ নাম্বারে যোগাযোগ করুন।

Cópias traduzidas estão disponíveis mediante pedido. É favor telefonar para

要求索取翻译本可致电 416-981-5500.

Переведенные экземпляры предлагаются по запросам. Звоните, пожалуйста, 416-981-5500.

نسخه ترجمه شده در صورت درخواست در اختیار شما قرار می گیرد.  
لطفاً به شماره 416-981-5500 تلفن بزنید.

Waxaa la heli karaa nuskhado turjuman haddii la codsado. Fadlan wax 416-981-

Des copies traduites sont disponibles sur demande. Veuillez téléphoner au 416-981-

Ejemplares traducidos se encuentran disponibles a solicitud. Favor de llamar al

Μεταφρασμένα αντίγραφα είναι διαθέσιμα κατόπιν αιτήσεως. Παρακαλώ καλέστε 416-981-5500.

மொழி பெயர்க்கப் பட்ட பிரதிகள் இருக்கின்றன. பெற விரும்புவோர் தயவுசெய்து 416-981-5500 ஐ அழையுங்கள்

વિનંતી કરવાથી અનુવાદિત કોપી મળી શકશે.  
મહેરબાની કરીને ૪૧૬-૯૮૧-૫૫૦૦ પર ફોન કરો.

Wo sre a, wo nsa beka nea y'akyere aseε no bi.  
Yeεre se fre 416-981-5500.

Traduzioni di copie sono disponibili su richiesta. Siete pregati di telefonare al 416-

Có sẵn bản dịch nếu quý vị cần.  
Xin gọi số 416-981-5500

Waxaad ka heli kartaa nuqulo ah Hagaha Badbaadada  
[torontohousing.ca/safetyguide](https://torontohousing.ca/safetyguide).



# Lifaaq 1: Lacallah haddii ay xaalad degdeg ihi ka timaado

## WARQADA MACUUMAADKA HADDII AY JIRTO XAALAD DEGDEG AH

### LA XIRIIR AKHBAAR

Magaca Koowaad \_\_\_\_\_ Magaca Saddexaad \_\_\_\_\_

Ciwaanka \_\_\_\_\_ Lambarka Dhismaha \_\_\_\_\_

Magaalada \_\_\_\_\_ Koodhka Boostada \_\_\_\_\_

Taleefanka Muhiimka ah (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ - Taleefan (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ - \_\_\_\_\_

Taariikh \_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_ sana

Jinsiyada  Lab  Dhedig  Jinsiyad kale - waxaan isku arkaa \_\_\_\_\_

Luuqada rasmiga ah \_\_\_\_\_

Tusaalayn caafimaad oo → Ku jira faylka \_\_\_\_\_

La xiriirid Degdeg ah 1 \_\_\_\_\_

Taleefanka muhiimka ah (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ Taleefan dheeraad ah (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ - \_\_\_\_\_

La xiriirid degdeg ah 2 \_\_\_\_\_

Taleefanka muhiimka ah (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ Taleefan dheeraad ah (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ - \_\_\_\_\_

Caafimaad baxnaaniyaha koowaad \_\_\_\_\_

Taleefan (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ - \_\_\_\_\_

### MUNAASADA AWO TAARII

#### B

Wadno xanuun, wadno -qabad, wado xanuun, garaaca wadnaha)

Istaroog/TIA

Sokoroow (Insulin/Waaxda aan insulin aan ku

COPD (emphysema, caabuqa hawo mareenka yar)

Qalal (miyir beelid)

Asaasaq

Xusuus la'aan

Wax kale \_\_\_\_\_



## DAAWEYNO

- 1) \_\_\_\_\_ 6) \_\_\_\_\_ 11) \_\_\_\_\_  
 2) \_\_\_\_\_ 7) \_\_\_\_\_ 12) \_\_\_\_\_  
 3) \_\_\_\_\_ 8) \_\_\_\_\_ 13) \_\_\_\_\_  
 4) \_\_\_\_\_ 9) \_\_\_\_\_ 14) \_\_\_\_\_  
 5) \_\_\_\_\_ 10) \_\_\_\_\_ 15) \_\_\_\_\_

## XASAASISYAD

- Xasaasiyad aan la   ASA  Sulfa  Koodiin

Wax kale \_\_\_\_\_

## TIXGELINO KHAAS AH

Infakshan la is qaadsiin karo/cudur \_\_\_\_\_

Wax kale \_\_\_\_\_

Ku xiran isbitaal \_\_\_\_\_ →  Taariikh

Khaas ahaan (Kaadi-sifayn, nudayaal, iwm) \_\_\_\_\_

## DHAQD / DAREEN

- Ilko  Aragda  Maqal

Ciladaha dhaqdhaqaaqa (socod bakooraad/gaari gacan/socod)

## XAYAWAAN GURIGA AGAJOOGA

Iiiska xayawaanka iyo tilmaamaha daryeelka xayawaanka

\_\_\_\_\_


Miyuu mid ka mid ah xayawaanku yahay xayawaan adeeg ah?  Maya  Haa \_\_\_\_\_

Foomka xiriirka 1 (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ - \_\_\_\_\_

Foomka Daryeelka 2 (\_\_\_\_\_) \_\_\_\_\_ - \_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_ Talee  
 fanka \_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_ / \_\_\_\_\_  
 ma bil sana



 Wac **416-981-5500** si aad u  
codsato hagaha badbaadada  
oo ku qoran luuqad loo rogay

